Ku soo dhawow Dugsiga

Degaanka Dhexe ee Waxbarashada Halifax

HRCE

| English | Wax ha ku qorin - waxaa buuxinaya shaqaalaha iskuulka | Somali |
|---|---|---|
| **School Name** | | **Magaca Iskuulka** |
| **School Contact Information** | | **Macluumaadka Xiriirka Iskuulka** |
| **School Principal and Vice Principal** | | **Maamulaha Iskuulka iyo Maamule Ku Xigeenka** |
| **Bell Schedule** | | **Waqtiyada Gambaleelku uu yeero** |
| **Grade(s)** | | **Darajooyinka** |
| Students are placed in grades based on their age and the | | Ardayda waxaa lagu qoraa darajooyin kala duwan iyadoo |

| | | |
|---|---|---|
| year they were born. | | loo eegayo da'dooda iyo sanadka ay dhasheen |

| English | Somali |
|---|---|
| **School Attendance**<br>Students are expected to attend school every day unless they are ill, have an appointment, or it is a special holiday you celebrate. | **Aadidda Iskuulka Maalin Kasta**<br>Ardayda waxaa laga filayaa inay maalin kasta tagaan dugsiga ilaa ay jiran yihiin, ballan la yeelan, ama aanay ahayn fasax gaar ah oo aad u dabbaaldegto |
| **Report an Absence**<br>Please contact the school in the morning to report your child will be absent. | **Iskuulka La Socodsii**<br>Fadlan la xidhiidh dugsiga subaxdii si aad u soo sheegto in ilmahaagu maqnaanayo. |
| **SchoolMessenger**<br>SchoolMessenger is an automated communication system that allows schools to communicate important information with families via voice, text, or email. It can provide automatic translation to over 100 languages. | **Warqaadaha Iskuulka**<br>Warqaadaha Iskuulka waa nidaam isgaarsiin oo toos ah kaas oo u oggolaanaya dugsiyada inay kula xiriiraan macluumaadka muhiimka ah qoysaska iyagoo isticmaalaya cod, qoraal, ama iimayl. Waxay ku siin kartaa turjumaad toos ah in ka badan 100 luqadood. |
| **PowerSchool**<br>PowerSchool's Parent Portal is where you can have your own account to access attendance, assessments, student schedule, report card grades, teacher comments, and bulletins for all students linked to the account | PowerSchool<br>Xariirka Waalidka ee PowerSchool waa meesha aad ku yeelan karto akoonkaaga si aad u gasho imaanshaha, qiimaynta, jadwalka ardayda, buundooyinka kaadhka warbixinta, faallooyinka macalinka, iyo ogeysiisyada dhammaan ardayda ku xidhan xisaabta |
| **Student Transportation - taking the school bus**<br>Students must live within the designated area of the school they are attending and meet the minimum distance criteria to be eligible for transportation.<br><br>Bussing is provided to:<br><br>Pre-Primary children and students in elementary (PP to Grade | **Gaadiidka Ardayga - raacitaanka baska dugsiga**<br>Ardaydu waa inay ku noolaadaan agagaarka aagga loo qoondeeyay ee iskuulka ay dhiganayaan oo ay buuxiyaan shuruudaha masaafada ugu yar si ay ugu qalmaan qaadashada baska iskuulka.<br><br>Basaska waxaa la siiyaa:<br><br>Carruurta iyo ardayda dhigata dugsiga hoose (PP ilaa Fasalka 6xaad) oo deggan illaa iyo in ka badan 1.6 KM iskuulka. |

| | |
|---|---|
| 6) who live more than 1.6 km from their school.<br><br>Students in junior high and secondary (Grades 7 to 12) who live more than 2.4 km from their school.<br><br>If a student has special permission to attend school outside of the designated area of their community, they are not eligible for transportation and parents/guardians must make arrangements to transport their children to school.<br><br>Transportation will be made available to any student who requires it because of special needs, regardless of the distance they live from the school<br><br>Ensure all pre-primary through grade 2 students are supervised by parents/guardians, or an individual designated by the parent/guardian, until the bus arrives in the morning and are there to greet the student in the afternoon. | Ardayda dhigata dugsiga hoose dhexe iyo sare (Fasalada 7 ilaa 12) ee ku nool in ka badan 2.4 km u jirta iskuulkooda.<br><br>Haddii ardaygu haysto fasax gaar ah oo uu ku aadayo dugsi ka baxsan goobta loo qoondeeyey ee bulshadooda, xaq uma laha gaadiid, waalidiintuna waa inay diyaariyaan sidii ay carruurtooda ugu qaadi lahaayeen iskuulka.<br><br>Gaadiid waa la heli karaa arday kasta oo u baahan baahida gaarka ah awgeed, iyada oo aan loo eegin masaafada ay kaga nool yihiin iskuulka<br><br>Hubi in dhammaan ardayda dugsiyada hoose/dhexe ilaa fasalka 2aad ay ilaaliyaan waalidiinta/mas'uuliyiinta, ama shakhsi uu magacaabay waalidka/mas'uulka, ilaa uu basku imanayo subaxdii oo ay halkaas u joogaan inay ku salaamaan ardayga galabtii markuu iskuulka ka soo laabto. |
| **School Arrival**<br>It is important for students to be at school on time. Students should not arrive more than 20 minutes before the bell because there is no supervision. | **Imaashada Iskuulka**<br>Waa muhiim in ardaydu ku sugnaadaan dugsiga waqtigii loogu talagalay. Ardaydu waa in aanay iman wax ka badan 20 daqiiqo ka hor gambaleelka sababtoo ah ma jiro macalin ilaalinaya oo iskuulka hortiisa ku sugaya ardayda. |
| **School Dismissal**<br>Students who do not take the school bus are required to be picked up from school when the last bell rings.<br><br>There are some after-school programs available. It is the parents' responsibility to secure, register, and pay for after school care for their children. Parents are responsible for picking their child up from after school programs. | **Markuu Iskuulku Dhamaado ee Ardaydu Ka Soo Rawaxdo**<br>Ardayda aan raacin baska dugsiga waxaa looga baahan yahay in laga soo qaado dugsiga marka gambaleelka u dambeeya uu soo dhaco.<br><br>Waxa jira barnaamijyo dugsi kadib jira. Waa mas'uuliyadda waalidka in ay sugaan, diiwaan galiyaan, oo ay bixiyaan kharashka daryeelka dugsiga ka dib ee carruurtooda. Waalidiinta ayaa mas'uul ka ah inay ilmahooda ka soo qaadaan barnaamijyada dugsiga ka dib. |
| **Breakfast Program**<br>The Breakfast Program is a free breakfast that is available to all students each morning. School members and community volunteers prepare and serve breakfast items such as cereal, | **Barnaamijka Quraacda**<br>Barnaamijka Quraacda waa quraac bilaash ah oo ay heli karaan dhammaan ardayda subax kasta. Xubnaha dugsiga iyo mutadawiciinta bulshada waxay diyaariyaan oo u adeegaan alaabta quraacda sida badarka, bagalada, rootiga, |

| | |
|---|---|
| bagels, toast, fruit,or yogurt. | khudaarta, ama caano fadhi ah. |
| **Lunch at School**<br>Please check with your school about their lunch programs. Some schools have cafeterias but others do not. You may have to send your child to school with enough food for a morning snack and their lunch.<br><br>Younger children go outside for part of the lunch hour. | **Qadada Dugsiga**<br>Fadlan kala xidhiidh dugsigaaga barnaamijyadooda qadada. Dugsiyada qaarkood waxay leeyihiin maqaaxiyo laakiin qaar kale ma haystaan. Waxaa laga yaabaa inaad u dirto ilmahaaga dugsiga iyagoo watta cunto ku filan subaxdii iyo qadadooda.<br><br>Carruurta yaryar waxay dibadda u baxaan qayb ka mid ah saacadda qadada. |
| **Water Bottles**<br>Please send a refillable water bottle to school with your child daily. | **Dhalooyinka Biyaha**<br>Fadlan soo sii carruurtaada maalin kasta dhalo biyo ah oo dib loo buuxin karo marka ay dugsiga aadayaan. |
| **Allergies**<br>Schools are peanut-free. Do not send items in your child's lunch that contain this ingredient. | **Xasaasiyadda**<br>Dugsiyadu waa ka mamnuuc lawsku. Ha u soo dirin qadada ilmahaaga alaabta ay ku jirto maaddadan lawska. |
| **School Clothing**<br>Students do not wear uniforms and can wear what they like.<br><br>Please send them in appropriate outdoor clothing (jackets, hats, mittens, boots). Extra hats and mittens are a good idea.<br>Indoor shoes - students will need a pair of sneakers/runners to wear indoors (elementary school) and for Physical Education class. They can stay at school<br><br>If you need help getting any of these items, please let the school know. | **Dharka Dugsiga**<br>Ardaydu ma xidhaan yunifoom waxayna xidhan karaan waxay jecel yihiin.<br><br>Fadlan u soo xidh dharka bannaanka ku habboon sida (jaakadaha, koofiyadaha, galoofiska, kabaha qabowga celiya). Iyo koofiyado dheeraad ah waa fikrad wanaagsan.<br>Kabaha gudaha - ardaydu waxay u baahan doonaan kabo goome ah oo lagu ordi karo laguna cayaari karo si ay ugu xidhaan gudaha (dugsiga hoose) iyo fasalka Waxbarashada Jirdhiska. Kobahaasi waxay u yaali karaan dugsiga<br><br>Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka mid ka mid ah alaabtan, fadlan u sheeg iskuulka. |
| **School Cancellation**<br>Schools can be cancelled for part of the day or the whole day due to snowstorms, power outages etc. You can receive emails or text messages to alert you when this happens.<br><br>When school is cancelled in the morning, there will not be | **Joojinta Iskuulka/ kansalidda Iskuulka**<br>Dugsiyada waa la joojin karaa qayb ka mid ah maalinta ama maalinta oo dhan sababtoo ah dabaylaha barafka, korontada oo go'aysa iwm. Waxaad heli kartaa iimaylo ama fariimo qoraal ah oo kuu sheegaya marka ay taasi dhacdo.<br><br>Marka dugsiga la joojiyo subaxdii, ma jiri doono bas ama galaas. |

| | |
|---|---|
| buses or classes<br><br>If school gets cancelled during the school day, you will get a text message from the School Messenger alert system. You have to inform the school of your plan for child care. For example: will they take their regular bus home, will they be picked up, and by whom, or are they going to a different location such as a friend or relative. | Haddii dugsiga la joojiyo inta lagu jiro maalinta dugsiga, waxaad heli doontaa fariin qoraal ah nidaamka digniinta School Messenger. Waa inaad u sheegtaa dugsiga qorshahaaga daryeelka ilmaha. Tusaale ahaan: ma u raacayaan baska caadiga ah guriga, ma loo imaan doonaa oo la qaadi doonaa, iyo cidda, ama waxay aadayaan meel kale sida saaxiib ama qaraabo. |
| **School Calendar**<br>The school year in Nova Scotia is from the beginning of September to the end of June. Summer vacation takes place in July and August and schools are not open.<br><br>Please check the school calendar for the exact dates for:<br>● First and last day of school<br>● Holidays<br>● Teacher's Professional Development day (no classes)<br>● Assessment & Reporting Days (no classes)<br>● Parent-Teacher meetings (no classes) | **Jadwalka Dugsiga**<br>Sanad dugsiyeedka Nova Scotia waxaa la bilaabo Sebtembar ilaa dhamaadka Juun. Fasaxa xagaaga waxa uu dhacaa Julaay iyo Agoosto, dugsiyaduna ma furna.<br><br>Fadlan ka eeg jadwalka dugsiga taariikhaha saxda ah:<br>● Maalinta koowaad iyo tan ugu dambeysa ee dugsiga<br>● Fasaxyada<br>● Maalinta Horumarinta Xirfadda Macallinka (wax xiisado ah ma jiraan)<br>● Maalmaha Qiimaynta & Warbixinta (wax xiisado ah ma jiraan)<br>● Kulamada waalidka iyo macalinka (wax casharo ah ma jiraan) |
| **Media Consent Forms**<br>From time to time, the schools, regional centres for education, and the Department of Education and Early Childhood Development would like to publish examples of student work, or personal information about a student such as the student's name, photograph, and school attended. This is done to recognize and encourage student achievement or learning, and to inform others about the school and its programs and activities.Showcasing students, their work, and their achievements is an important part of school life, and is a very positive experience for students. Before the school, regional centre for education, or the department does these things, we need your permission.<br><br>A few examples are:<br>● Student work or student artwork shared in printed materials, websites, electronic documents<br>● Names and images published in a school yearbook<br>● Student academic or athletic achievements published in | **Foomamka Oggolaanshaha Warbaahinta**<br>Waqti ka waqti, dugsiyada, xarumaha gobolka ee waxbarashada, iyo Waaxda Waxbarashada iyo Horumarinta Carruurta waxay jeclaan lahaayeen inay daabacaan tusaalooyinka shaqada ardayga, ama macluumaadka shakhsiyeed ee ardayga sida magaca ardayga, sawirka, iyo dugsiga uu dhigto. Tan waxa loo sameeyaa si loo aqoonsado loona dhiirigaliyo guusha ama waxbarashada ardayga, iyo in lagu wargaliyo dadka kale wax ku saabsan dugsiga iyo barnaamijyadiisa iyo waxqabadyadiisa. Soo bandhigida ardayda, shaqadooda, iyo guulahoodu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah nolosha dugsiga, waana khibrad aad u wanaagsan ardayda . Kahor intaan dugsiga, xarunta gobolka ee waxbarashada, ama waaxdu waxyaalahan samayn, waxaan u baahanahay ogolaanshahaaga.<br><br>Tusaalayaal dhowr ah waa:<br><br>● Shaqada ardayga ama farshaxanka ardayga ee lagu wadaago agabka daabacan, shabakadaha internetka, dukumeentiyada elektarooniga ah<br>● Magacyada iyo sawirada lagu daabacay buug-sannadeedka<br>● Horumarka tacliimeed ee ardayga ama ciyaaraha fudud ee lagu daabacay |

| | |
|---|---|
| a school newsletter or on a school website, including social media such as Facebook and Twitter<br>● a student's photo and identifying information may be shared with newspaper or television media, or students may be photographed or interviewed by the newspaper or television media.<br>● a student may be videotaped or photographed by other students as a class project, or classroom activities may be videotaped or photographed and shown to teachers for their professional development or appear on a website for school or regional centre for education<br>● pieces of student writing may be shown to teachers for professional development purposes, without the student's name or other identifying information.<br><br>You can withdraw consent at any time by telling the principal at your child's school. You must sign the form every year and indicate if yes, you consent or no, you do not consent.<br><br>Birthdays and student numbers are never shared or made public. | warsidaha dugsiga ama wargeyska dugsiga, oo ay ku jiraan baraha bulshada sida Facebook iyo Twitter<br>● Ardayga sawirkiisa iyo macluumaadka lagu aqoonsan karo waxa lala wadaagi karaa war-baahinta ama telefiishanka, ama ardayda waxa laga yaabaa in la sawiro ama ay waraystaan jaraa'idka ama warbaahinta telefishinka.<br>● Ardayga waxaa laga yaabaa in arday kale laga duubo muuqaal ama sawiro sida mashruuc fasalka ah, ama waxqabadyada fasalka waa laga yaabaa in laga duubo ama la sawiro oo la tuso macalimiinta si ay u horumariyaan xirfadahooda ama ay ka muuqdaan bogga internetka ee dugsiga ama xarunta gobolka ee waxbarashada.<br>● qaybo ka mid ah qoraalka ardayga ayaa laga yaabaa in loo tuso macalimiinta ujeedooyinka horumarinta xirfadeed, iyada oo aan magaca ardayga ama macluumaadka kale ee aqoonsiga.<br><br>Waad ka noqon kartaa ogolaanshaha wakhti kasta adiga oo u sheegaya maamulaha dugsiga ilmahaaga. Waa in aad saxiixdo foomka sanad walba oo aad muujisaa haddii ay haa tahay, aad ogolaatay ama maya, ma aadan ogolaan.<br><br>Maalmaha dhalashada iyo nambarada ardayda weligood cidna lalama wadaago ama lama shaaciyo. |
| | |